# SOMALI VOICE OF NEW ERA PROGRAM NO 1035
# THE I EPISTLE OF APOSTLE PETER
# CHAPTER 1:8-13

Halkani waa raadiyo Transworld oo idinku soo dhowaynaya barnaamij tafsiir ah oo soconaya muddo nusa-saac ah. Waxaana barnaamijkan Codka Waayaha Cusub ee waxbaridda ah idiin soo diyaariya Masiixiyiin Soomaali ah, waxaana laga maqlaa barnaamijkan habeenka Isniinta ilaa iyo habeenka jimcaha, saacaddu markay tahay 7:25ka fiidnimo, mawjadda 31ka miterband.

**OPENING SINGNATURE TUNE UP 25 SEC. AND UNDER.**

Mar kale ayaannu dhegaysatayaal idinku soo dhowaynayaa barnaamijka, waxaannu horey idiinku sii wadaynaa daraasaadka aynu ka soo xiganayno kitaabka qoduuska ah ee aynu ugu magac-darnay, **"Dhex-marka Kitaabka Qoduuska ah."**

Waa barnaamij aad ku baranaysaan kutubta Babaylku uu ka kooban yahay, haddii ay ahaan lahaayeen kuwii Axdigii Hore iyo kuwa Axdiga Cusub. Waxaannu horey idiinku sii wadaynaa dhegaystayaal horudhicii Warqaddii kowaad ee rasuul Butros. Rasuul Butros waxa uu ka hadlayaa maaddooyin culus oo ay ka mid tahay waxbaridda khusaysa kuwa Ilaah doortay intaan dunida la uumin.

Waxaana uu rasuulku leeyahay, Sida ku qoran aayadda labaad ee cutubka 1aad oo leh: **"Oo lagu doortay aqoonta Ilaaha Aabbaha ahu horey u sii ogaa, oo qodduus lagaga dhigay ruuxa Xagga adeecidda iyo rushaynta dhiigga Ciise Masiix. Nimco iyo Nabadu haydiin bateen."**

**SONG: REEL----CUT-----**

Markii noogu waxay inoo joogtay meeriska cutubka kowaad aayadda toddobaad, markaasoo rasuulku uu

lahaa: **"Si loo tijaabiyo rumaysadkina, oo aad uga sii qaalisan dahabka oo ah wax baaba'a in kastoo dab lagu tijaabiyo. Markaasaa laga helayaa mahad iyo ammaan iyo ciso markii Ciise Masiix la muujiyo."**

Waxaan haddaba isla aragnay in Butros imminka ka hadlayo waxyaabo qaali ah. Waxaa la yaab noqotay in nin Butros la mid ah oo kalluumayste ah uu ka hadlo waxyaabo qaali ah, maxaa wacay noloshaas ma uusan garanayn ninkaas kalluumaystaha ah. Waxaana rasuulka oo imminka aan ahayn kalluumaystihii hore, laakiin uu wado Ruuxa Qodduuska ah, ayaa kala garanaya waxyaabaha qaaliga ah iyo waxyaabaha aan qaaliga ahayn.

Waxaana rasuulku uu imminka leeyahay, **"Waa in la tijaabiyo rumaysadkiinna, oo aad uga sii qaalisan dahabka oo ah wax baaba'a inkastoo dab lagu tijaabiyo."** Haddaba marka dahabka la helo waxa ay ku shubaan kuwa dahablayda ahu weel dab lagu guduudiyey. Ujeeddaduna maahan in dadhabka la burburiyo, laakiin waa in dahabka la sifeeyo.

Marka dahabka uu dhalaalo waxaa meel isugu imanaya dahabkii saafiga ahaa, waxaana kol dambe aannu arki doonnaa rasuul Bawlos oo tusaale inagu siinaya sida dahabka loo tijaabiyo, iyadoo taas uu u isticmaalayo ama uu la barbardhigayo silica soo wajahaya masiixiyiinta markii ay ku joogaan tubta Masiixa. Waxaa uu leeyahay imminka waa layna soo furtay, oo welibana laynaguma soo furan dahab iyo qalin, waxaase laynagu soo furtay waxyaabo ka qaalisan dahabka iyo weliba qalinka, waana dhiigga Ciise Masiix.

Markii Ilaah ina tijaabiyo haddaba wuxuu ina dhex galinayaa xiisado daran. Sidaana u samayn maayo

inuu ina baabi'iyo ama inuu ina wax yeelleeyo, wuxuuse sidaa u yeelayaa inuu inaga dhigo sida dahabka saafiga ah oo kale. Taasina waa sida aynu ku dambaynayno oo waxaynu noqonaynaa masiixiyiin khaalis ah oo aan innaba u dhicin xiisadaha daran ee nolosha.

Haddaba saaxiibbayaal tijaabada ama xiisadaha daran ee nolosha waa waxa horumariya dabeecadaha qofka masiixiga ah. Markaa ninna yaanu hadal aan soconaynin idinku beer laxawsan, runtuna waxay tahay in aniga iyo adigaba aynaan dhammayn, oo kaamilnimo aynaan ku gaari karin xooggayaga iyo camaladayada. Waa inaynu si hoosaysa oo aan qab iyo kibir lahayn Ilaah ugu soo dhowaanno innagoo garanayna inaynu dembiileyaal nahay, Masiixuna wuu ina badbaadinayaa. Ilaah wuxuu inagu badbaadinayaa nimcadiisa inoo soo maraysa dhiigga Ciise Masiix. Wuxuu doonayaa in noloshiis a laynaga dhex arko, wuxuuna isku taxluujinayaa inuu taa inagu baro xiisadaha daran ee noloshayada la soo gudboonaada, Ilaahna wuu ina soo dhowaynayaa. Haddaba waxaan idiin sheegayaa inaan la arkaynin si kale ee qofka uu ugu gaamurayo Masiixa, haddaanay jirin xiisado daran oo noloshiisa la soo gudboonaada.

Waxa keliya oo aynu ku gaamuraynaa waa xiisadahaa lagu tijaabinayo rumaysadkayaga ee Ilaah inoo soo dirayo. Waxaa rasuulku leeyahay, sida ku qoran aayaddii toddobaad, "Markii Ciise Masiix la muujiyo." Waxaan markaa rumaysanahay markii Masiixu muuqdo inaynu Ilaah uga mahad celin doonno xiisadihii soo wajahay noloshayada.. Waxaaba aynu jeclaysan doonnaa oo aynu isku oran doonnaa, "Maxay xiisaduhu inoogu badan waayeen?" Maxaa

wacay waxaynu arki doonnaa sida xiisaduhu ay hortiisa ugu ahmiyad weyn yihiin.
Bal waxaad ka fakartaa xiisadihii ay soo mareen rasuullada, sida Simoon
Butros, rasuul Bawlos iyow eliba rasuulladii kale. Waxaa weliba rasuul Butros garanayey in la qodbi doono, oo weliba dhibaatooyin culusina ay hor yaallaan. Waxaana uu imminka leeyahay imminka, xiisadaha waxaa inooga soo bixi doona hadiyado ka qaalisan dahabka iyo qallinka, waana waxa aynu dhowri doonno ama sugayno.
Waana hadiyadahaas Ilaah bixin doono kuwa aynu diiradda saarayno imminka. Haddaan markaa dib ugu soo noqonno meeriska cutubka 1aad ayaannu horey idiinku sii wadayaa cutubka, oo aan idiin akhriyayaa aayadda 8aad, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan: **"Isaga ma aydin arkin, waadse jeceshihiin, hadda in kasoo aydnaan arkin, waadse rumaysan tihiin, oo waxaad ku faraxdaan farxad aan la sheegi karin oo ammaan leh."**
Haddaba aayaddaasu waxay inoo tahay innaga wax weyn. Xusuuso haddaba in rasuul Butros la socday Ciise Masiix saddex sannadood. Haddaba saddexdaas sannadood waxa uu la kulmay dib-u-dhacyo fara badan, oo mararka qaarkood Sayid Ciise Masiix ayaa isaga canaanan jiray. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa Sayid Ciise Masiix xertiisa quraac ugu diyaariyey xeebta Badda Galalii. Waxaa raggaas ka mid ahaa Butros, oo waxa ay kula noqon kartaa haddii aad qisada rasuul Butros aqriso in Butros ku xad-gudbay Ciise Masiix. Waxaana markaa ay kula noqonaysaa in Sayid Ciise Masiix ku oran lahaa Butros: "War nin lagu kalsoonaan karo ma tihid maxaad ii dafirtay? Haatan dabadeed dhinac baan

iska kaa marinayaa, oo waxba kuu dirsan maayo." Habase yeeshee Sayid Ciise Masiix sidaa kuma oran Butros, wuxuuse uu ku yiri, "Simon ina Yoonisow ma I jeceshahay?"

Haddaba ninkii ugu hadalka badnaa xerta oo ugu dhaadhaca ama khatifka badnaa ayaa imminka la dejiyey, oo waxaa uu helay Ruuxa Qodduuska ah oo isaga u noqday dejiye. Ugu dambayntiina waxaa uu Masiixa ku yiri, "Sayidow waad og tahay inaan ku jecelahay." Markaasaa Sayid Ciise Masiix ku yiri, "Idahayga daaji." Waxaa markaa uu ahaa Butros kii dadka ku wacdiyey khudbaddii u horraysay ee dad badan isku mar lagala hadlo wax ku saabsan Masiixa maalintii Bentakost.

Imminka waxa uu Butros kugu leeyahay, "Isaga ma aydnaan arkin waase jeceshihiin". Waa Ruuxa Qodduuska ah waxa hubaal niyadaheenna uga dhigaya Masiixa. Saaxiib taasi waa qarsoodiga nolosha Masiixinnimada. Markii aynu Masiixa jecel nahay wax kastoo kale way inoo hagaagayaan. Haddii markaa qof aanu jeclayn Masiixa, wax caawiyi kara qofkaa ma lahan xitaa haddii uu maal badan helo. Mar waliba wax baa ka dhimanaanaya.

Welibana Masiixa kuu dhiiban maayo idaha, ama aan iraahdo xubnaha wehelnimada. Oo rasuul Butros ayaa wuxuu leeyahay, "Isaga ma aydin arkin, waadse jeceshihiin, hadda in kastoo aydnaan arkin. Waadse rumaysan tihiin, oo waxaad ku faraxdaan farxad aan la sheegi karin oo ammaan leh." Miyaanay taasi ku farxadgelinaynin saaxiib? Miyaadan markaa Masiixa jeclayn?

Mise waxaad rumaysan tahay xeerar iyo diimo ficil ah, laakiin aan shaqaynaynin. Waxaan markaa saaxiib kuu sheegayaa in Masiixa wax lala

barbardhigaa aan la arkaynin. Simon Butros aad buu u jeclaa Masiixa, Bawlosna aad buu u jeclaa, oo cid waliboo isaga u adeegtaana way jeceshahay. Waxaana aniga aan rajaynayaa kuwiinna haatan maqlaya wacdiga, inaad bilowdeen inaad Masiixa jeclaataan. Waxaan rajaynayaa in adiga qudhaadu aad imminka jeceshahay isaga. Haddii aad Masiixa jeceshahay dhibaatooyin badan ayaad ka gudbaysaa. Waxaana laga dheeraanayaa xurguf waliba ee qoyska soo gelaysa, maaddaama ay lamaanayaashu ay jecel yihiin Masiixa. Isaga ayaa hagaajinaya xiriirka qoyska, waana wax la yaab leh sida jacaylka Masiixa uu niyadaheenna isugu xiro, waa kuweenna masiixiyiint ahe. Haddaba maahan in xiriirka Masiixa uu gacan ka geysanayo qoyska oo keliya, xitaa wehelnimada gacan buu ka geysanayaa. Jacaylka Masiixa waxaa uu isku soo dhoweeyaa rumaysatayaasha, wuxuuna jacaylka Masiixa gacan ka geysan karaa xiriir waliba ee aad bulshada la leedahay, waase haddii aad Masiixa si weyn u jeceshahay.

Ugu dambaystii wuxuu rasuul Butros ku leeyahay aayadda 8aad, "….Oo waxaad ku faraxdaan farxad aan la sheegi karin oo ammaan leh." Inaad markaa Masiixa jecdeshahay waxay farxad gelinaysaa niyaddaada. Saaxiib ma waxaad tahay mid faraxsan maanta, mise niyadjab iyo qoomamo ayaa ku haysata? Waa khasab in farxaddaadu buuxsanto haddii aad masiixi tahay, waayo waxaad ka mid tahay wiilasha Boqorka, oo waxaad leedahay dhaxal ku sugaya oo aad heli doonto maalin maal aha ka mid ah.

War maxay wanaagsan tahay inaad noqotaan wiilasha iyo gabdhihiisa. Haddaan meeriska cutubka kowaad ee warqaddan kowaad ee rasuul Butros idiin sii

wadno ayaa waxaa aayadda 9aadi leedahay sidatan: **"Waxaadna helaysaan waxa rumaysadkiinnu ku dhammaado oo ah badbaadada naftiinna."**
Nabaadiinada Ilaah ayaa waxay ahayd mawduuca waxyiyada kitaabak Axdigii Hore. Markaana nebiyadii iyo rasuulladiiba waxay ka markhaati kaceen xaqiiqdaa iyada ah. War maxay dhiirrogelin u tahay kuwa kala firdhay oo u silcayey rumaysadkooda. Waxaan imminka soo gaarnay maaddada khusaysa:

SILICA IYO WAXA QORNIINKU UU KA LEEYAHAY

Haddaan arrinkaa isaga ah idiinka akhriyo qorniinka, ayaa waxaa rasuul Butros leeyahay imminka sida ku qoran Warqaddiisii Kowaad 1:10 oo leh:
**"Nebiyadii sii sheegay nimcada idiin imanaysa waxay doondooneen oo aad u raadiyeen wax ku saabsan badbaadadaas."**
Haddaba waa dhab in nebiyadii oo dhan ay sii sheegeen badbaadadaas imanaysa. Haddaan horey idiinku sii wado cutubka 1aad ee warqaddan kowaad ee rasuul Butros ayaan imminka idiin akhriyayaa aayadda 11aad, oo waxaa ay leedahay:
**"Waxayna raadiyeen wixii iyo wakhtigii Ruuxii Masiixa oo iyaga ku jiray uu u tilmaamay markuu horey uga sii markhaati furay waxyaalaha Masiixu ku xanuunsan doono iyo waxyaalaha ammaanta ah oo iyaga ka daba iman doona."**
Nebiyadii waxay ka sii hadleen silica Masiixa qabsan doona iyo nimcada Ilaah, waxaana ay ku qoran tahay kitaabkii Ishayaah cutubka 53aad, iyo kitaabka Sabuurada cutubka 22aad, iyo weliba meelo badan oo ka mid ah Qorniinka. Waxaa kaloo rasuul

Butros leeyahay, "…iyo ammaanta imanaysa.." Taasoo horey loogu sii sheegay kitaabkii Ishacyaah iyo Sabuurka 45aad.

Nebiyadii oo dhan waxay ka hadleen silicii Masiixa iyo maxbuusnimada iyo ammaanta imanaysa marka Masiixu dunida u yimaado sida boqor oo kale oo uu dhulkana ka taago boqortooyadiisa. Waxaa kaloo rasuul Butros leeyahay: "Wakhtigi ruuxii Masiixa oo iyaga ku jiray oo u tilmaamay markii uu horey uga sii markhaati-furay waxyaalaha Masiixu ku xanuunsan doono."

Waxaa taasu inoo sheegaysaa in nebiyadii Axdigii Hore lahaayeen Ruuxa Masiixa oo ka dhex hadlaya. Waxaana warbixinnadaasu ay ku badan yihiin Hadallada Ilaah, oo waxaa laynoo sheegayaa in kitaabka Axdigii Hore uu ku ahaaday Ruuxa Ilaah, oo kuwii qoray waxay ku qoren Ruuxa Masiixa. Waxaa ay qorayeen waxyaabo ayan iyaga qudhoodu garan karaynin.

Waxaa ay bareen macaaniga oo rasuulkuna waxaa uu leeyahay, **"..Oo waxayna raadiyeen wixii iyo wakhtigii Ruuxii Masiia oo iyaga ku jiray uu u tilmaamay markuu horey uga sii markhaati furay waxyaalaha Masiixu ku xanuunsan doono iyo waxyaalaha ammaanta ah oo iyaga ka daba iman doona."**

Waxaa kitaabka Axdigii Hore ku qoran meelo badan oo looga hadlayo silicii Masiixa, iyo meelo kale oo looga hadlayo maxbuusnimada Masiixa markii uu la yimaado boqortooyadiisa imanaysa wakhtiga Sabaanka. Waxaa laysku xiray nimco iyo ammaan, oo iyaga waa nebiyadii hore e, way ku adkayd inay fahmaan. Tusaale ahaan, Ishacyaah waxaa uu cutubka 53aad ku qoran silicii Masiixa, dabadeedna waxaa

uu cutubkii 11ad ku qoray imaanshaha Masiixa oo isagu ku imanaya dunida awood oo welibana ka taagaya boqortooyadiisa. Haddaba waxay u muuqataa in labada cutub ay is-xaglinayaan haddii ay ka hadlayaan Masiixa. Waxaana ay nebiyadu ay isku taxluujin jireen inay is-waafajiyaan si dadku ay hagaag ugu arkaan waxyiyada.

Haddaba nebiyadii waxay wax sii sheegeen wakhtiyo dheer, waxaana ay arkeen laba dhacdo, laakiin haddana ma ayan garanaynin inta u dhexaysa, waa imaanshaha hore iyo kan dambe ee Masiixa. Haddaba dhegayste aniga iyo adiga waxaynu imminka nool nahay wakhti u dhexeeya markii la silciyey oo la soo dhaafay iyo wakhtiga Masiixa la ammaani doono oo imanaysa wakhti mustaqbalka ah.

Markaa waxaad awoodi doontaa inaad fahamto waxyiyada khuseeya mustaqbalka iyo madaxbannaanida weynaanta Masiixa haddii aad u eegto sida laba dhacdo oo u dhexeeya wakhti aan la garanayn. Imaanshaha kowaad iyo imaanshaha labaad ee Masiixa wakhti baa u dhexeeya aan la garanayn, laakiin mar ay noqotaba Masiixu wuu imanayaa.

Haddaba nebiyadu waxay arkeen labadan wakhti oo kala duwanaa, laakiin maaddaama ay kor ama dusha ka arkeen, waxay la noqonaysaa inay isku dhow yihiin, laakiin wakhti baa u dhexeeya. Waxaa uu nebi Ishacyaah dusha ka arkay silica Masiixa, waxaa kaloo uu arkay ammaanta Masiixa. Haddaba maahan aragtiyo iska soo horjeeda ama is-xaglinaya. Wuxuu arkay labadaa goor, laakiin labadaa goor way ahaanayaan, oo horey baa loo arkay silicii Masiixa, oo isagu dunida ayuu yimid.

Waxaana uu dembiyadeenna u bixiyey dhiiggiisii qaaliga ahaa ama nafsaddiisa, waxaana imanaya wakhti markaasoo Sayid Ciise Masiix uu boqortooyadiisa ka taagi doono dunida. Waxaan markaa hubaa inay jireen kuwo wakhtigiisii ama wakhtigii nebiyadu ay dadka wax barayeen oranayey, **"…taasu suuragal maahan."** Ha yeeshee innagu waxaynu garanaynaa in Masiixu dunida yimid oo welibana uu bixiyey dembiyadeennii.

Waxaana soo yaraanaya haddaba fogaanshihii wakhtiga u dhexeeya kan Kiniisadda iyo wakhtiga boqortooyada. Waxaa uu sayid Ciise Masiix ka soo tegay wakhtigii siliciisa, waxaana uu ku sii jeedaa wakhtiga uu qaadanayo carshiga oo ah wakhtiga ammaanta. Imminka innaguna waxaynu nool nahay marka Ciise Masiix uu ku sii jeedo carshiga ammaantiisa. Haddaan horey idiinku sii wado meeriska cutubka kowaad ee Warqaddii kowaad ee rasuul Butros 1aad, ayaan imminka idiin akhriyayaa aayadda 12aad, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Oo waxaa iyagii loo muujiyey inaanay iyagu isugu adeegin waxyaalahaas, laakiinse idinkay idiinku adeegeen, oo waxyaalahaas waxaa idin ogaysiiyey kuwii Iniiilka idinkaga wacdiyey Ruuxa Qodduuska ah ee jannada laga soo diray; waxyaalahaas oo ay malaa'iguhuna jecel yihiin inay fiiriyaan."**

Haddaba rasuulku waxa uu leeyahay, **"Waxaan imminka innaguna idinku wacdiyeynaa isla wixii nebiyadii hore dadka ay ku wacdiyeen."** Tan kala duwanaanshaha keenaysa ee rasuullada iyo nebiyada ay ku kala duwan yihiin ayaa waxay tahay in rasuulladu ay garanayeen waxa ay ka macne tahay silica Masiixa. Laakiin nebiyadii hore dusha un bay wax waliba ka arkayeen, laakiinse uma

xaqiiqsanayn. Maxaa wacay iyagu ma noolayn ama sooma gaarin wakhtiga marka Masiixu ku silcayo iskutallaabta.

Rasuulladuse goob joog bay ka ahaayeen siday u badnaayeen, waxaana ay ogaayeen in Masiixu Iskutallaabta ugu dhintay dadka oo dhan. Marka uu leeyahay rasuul Butros, **"Waxyaalahaa oo ay malaa'iguhuna jecel yihiin inay fiiriyaan,"** ayaa waxaa taasu ay ka macne tahay in malaa'iguhu ay dusha sare iyaguna ay ka eegayaan oo leeyihiin, **"War innagana maxaa farriimahaas laynoogu soo dhiibi waayey?"** Waxaan markaa xusuusanahay in malaa'iguhuna ka qayb-qaateen, oo ay farriinta Injiilka ay iyaga qudhooduba soo gaarsiiyeen shakhsiyaad kala duwan. Malaku Jabriil wuxuu soo gaarsiiyey farriinta dhalashada Masiixa Maryama. Waxaa kaloo uu u yimid Malaku Jabriil Sakariyas oo waxaa uu u sheegay in isaga iyo xaaskiisu ay heli doonaan wiil, kaasoo noqon doona mid Masiixa dadka u sheega, oo welibana u muujiya. Welibana waxaan hubaal in Jabriil jeclaan lahaa inuu dunida yimaado, oo uu inagu boorriyo, waa kuweenna masiixiyiinta ah e, inaynu horey u sii wadno hawsha wacdiska.

Markaa waa dhab in malaa'iguhu ay jeclaan lahaayeen inay ka qayb qaataan baafinta akhbaarka Injiilka. Haddaba Ilaah wuxuu raalli ka noqday in dadku ay is-gaarsiiyaan Injiilka Masiixa. Markaa haddii masiixi aad tahay adiga dhegayste, waxaa kuugu dhex nool Ruuxa Qodduuska ah oo kugu hoggaaminaya waddooyinka Masiixa. Waxaana rasuul Bawlos arrinkaas u faahfaahinayaa masiixiyiinta sida ku qoran warqaddiisii reer Rooma 8:9, oo wuxuu leeyahay:

"Laakiinse idinku kuma dhex jirtaan jidhka, ilowse waxaad ku dhex jirtaan Ruuxa, haddii Ruuxa Ilaah idinku jiro. Laakiinse nin hadduu Ruuxa Masiixa lahayn, kaasu kiisii maahan."
Haddii markaa aad tahay nin masiixi ah, waxaa kugu dhex jira Ruuxa Qodduuska ah. Imminka miyaad garanaysaa waxa malaa'iguhu kuu samayn karaan, oo aanu Ruuxa Qodduuska ah kuu samayn karin? Maya, waayo waxaannu nool nahay wakhti Ruuxa Qodduuska ah uu hawsha qabanayo, waana wakhtiga nimcada, marka Ruuxa Qodduuska ah ee Ilaah uu qaadayo waxyaalaha Masiixa, oo uu dabeeto inoo muujinayo. Haddaba maxaynu yeelaynaa inta aynu ku dhex jirno wakhtiga nimcada maaddaama aan malaa'igu la arkaynin iyo weliba nebiyo? Bal aynu eegno waxa rasuul Bawlos inagula talinayo, sida ku qoran Warqaddiisii Kowaad 1:13, waxaa markaa Qorniinku leeyahay sidatan:
"**Haddaba isku giijiya guntiga maankiinna, dhug yeesha, oo aad u rajeeya nimcada laydiin keeni doono markii Ciise Masiix la muujiyo.**" Wuxuu leeyahay rasuulku, "Guntiga maankiinna giijiya," wuxuuna ula

jeedaa in kuwa daallan oo xagga qalbiga ka daallay ay wax si ka noqon karaan, markaa waxaa uu doonayaa maaddaama socdaalku dheer yahay in 'guntiga dhiisa laysaga dhigo', waa xagga fikirka, si markaa kuwa socotada ah ee Injiilka Masiixa qaatay ayan u daalin inta ay socdaalka ku jiraan. Waxaa rasuulku isticmaalayaa halku-dhegyo ay garan karaan dadkii maalmihiisa, oo weliba innagu waynu waynu garanaynaa waxa ay ka macne tahay, 'In Guntiga Dhiisha laysaga dhigo', balse garan mayno waxa ay ka macne tahay in guntiga dhiisha laysaga dhigo xagga fikirka. Habeen dambe ayaannu meeriska cutubka iyo weliba faallada halkii idiinka sii wadi doonna, haatanse aynu wada dhegaysanno qasaa'idkan:

**SONG: REEL----CUT----**

Halkani waa TWR, Idaacadda TWR oo idinku leh Ilaah haydin barakeeyo oo haydinku anfoco wixii aad caaway ka maqasheen barnaamijka. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli-doontaan habeen dambe (hadahan oo kale) isla mowjaddan 25ka miterban. Haddiise aad doonaysaan inaad fikirkiinna ka dhiibateen wixii aad caaway maqasheen ayaad nagala soo xiriiri kartaan somtwr@twr.co.ke.

Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan: P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Waxaa kaloo aan idin siin doonaa website aad ka maqashaan barnaamijyadeenna Soomaaliga ah, si kuwiinna doonaya inay koorasyo ka qaataan Baybalka ay ugu hirgasho.

**SIGNATURE TUNE UP 6 AND UNDER**

Halkani waa TWR oo idiin rajaynaya Habeen Baraare iyo barwaaqaba leh. Inta aynu ka gaari doonno wakhti aynu ku kulanno Barnaamij la mid ah kan

caaway aad maqasheen, waxaan idinku leenahay nabadda Ciise Masiix, ha idiinku badato xagga jidhka iyo ruuxaba Aamiin